



# Hore u qorsheyso haddii aad khatar sare ugu jirtid xannuun daran inuu kugu dhaco haddaad qaado COVID-19 iyo hargab

## Miyaad ugu jirtaa xannuun khatar sare leh haddii aad qaado COVID-19 iyo hargab?

### Tan waxaa ka mid ah:

- Dadka jira 60 sanno ama ka weyn
- Dumarka uurka leh
- Aborujinaal, Torres Strait Islander iyo dadka Pacific Islander ka ah
- Dadka aadka u buuran, sonkorta qaba, qaba cudurka wadnaha oo daran, cudurka sambabada oo soo noqnoqda ( oo ay ku jiraan neef daran oo u baahatay in isbitaal lagu dhigo 12 bilood ee ugu danbeysay), cudurka kelyaha ama beerka oo daran soona noqnoqda, kansar nool ama leh difaaca jirka oo daciif ah
- Dadka qaarkii leh iin oo ay ku jiraan kuwa leh iin saameynaysa sambabadooda, wadnahooda ama habka difaaca jirka
- Degenayaasha tahsiilaadka daryeelka iinta iyo daryeelka dadka da'da ah
- Dadka jira 18 sanno ama ka weyn oo aan tallaalneyn.

Haddii aad jirato, waxaa laga yaabaa in dhakhtarkaagu ku taliyo daawada ka hortagta fayraska si ay kuu caawiyaan inaad fiicnaato.

Waxaad u baahan doontaa inaad qaadato daawadaan sida ugu dhakhsaha badan ka dib markaad jirato.

Hore u qorsheyso oo kala hadal dhakhtarkaaga hadda wax ku saabsan in daawada ka hortaga fayrasku ay kugu haboon tahay.

Haddii aad qabto wax saluug caafimaad ah oo aad u baahan tahay taageero luuqadeed ka wac TIS **131 450** oo weydiiso NSW Health Flu iyo COVID-19 Care ee Home Support Line **1800 960 933**.

Booqo [www.nsw.gov.au](http://www.nsw.gov.au) wixii macluumaad dheeraad ah.